

10/2/2014

Diidmo qayaxan ee Beesha Murrasade eey uga soo horjeedo qaabka eey Dowlada Federalka Soomaliya ugu sameyneyso Dowlad Gobaleedka Gobalada dhexe.

Hordhac

Beesha murusade ma diidana, waxeeyne diyaar u tahay in eey qeyb lixaad leh ka qaadato dhismaha Dowlad Gobaleed xalaal ah oo eey leeyahiin dadka dega Mudug iyo Galgaduud.

Waxaan aamin sannahay in Dowlad u sameynta Gobaladan lala soo daahay, hadii mar hore la sameyn lahaana waxeey kor u qaadi laheyd nololeynta dadka dega Gobaladan. Dowlada Dhexe iyo Beesha Caalamka wey kala soo daaheen Dowlad u sameynta Gobalada dhexe.

Waxaan kaloo aaminsannahay in qaabka Dowlad u sameynta Gobaladan loo maro si xalaal ah, dimoqoradi ah, qayaxan, cadaaladna eey ku dheehan tahay. Ahna mid Beelaha halkaas dega eey dhamaan u dhan yahiin. Waxaan ka digeynaa siyaasad leysku qasbo, sad bursi beeleed iyo daneysi aan dan guud ku jirin.

Mabaadi'da Cadaalada iyo sinaanta waxay na fareysaa in aan cidna lagu qasbi karin heshiis eeysan qeyb ka aheyn.

Anagoo si dhab ah u aaminsan mabaa dii'da kor ku xusan ayaa:

Shacbi metala Beesha Murrasade 'Karanle', ixtiraamne ku dhex leh, kana kooban Oday dhaqameed, xildhibaano, indheer garad, haween iyo dhalinta Beesha oo kuluma badan ka yeeshay arinkan dowlad gobaleedka ayaa isku raacay bayaanka hoos ku xusan.


























Bayaan:

- ❖ Dowlad sameynta Gobalada dhexe waxaa lagu bilaabay cadaald daro' qayaxan oo saameysay beelo badan.
- ❖ Go' aanka gogasha shirka lagu dhigayo waxaa la qaatay iyadoo anaga iyo beela badan oo kale aan lagala tashan, laga qeyb gelin, raalina eeysan ka aheyn.
- ❖ Meesha Beelaha qaarkood laga qeyb geliyay, lagana aqbalay sharuudahooda, sida gogosha shirka meesha lagu qabanaayo, si eey u ogalaadaan in eey shirka ka qeyb qaataan.
- ❖ Maa daama la gaaray go'aama aanan nalagala tashan, ama aannan ku qanacsaneyn waxaan bayaankan ku cadeyneynaa in aanan qeyb ka aheyn, aqoonsanna doonin Dowlad

Gobaleed ku saleysan cadaalad daro. Waxaan xaq u leennahay in aan gooni ka ahaano wax kasta ha nagu qaadatee.

- ❖ Gogosha shirka waxaa go'aan keeda gaaray beelo gooni ah, iyadoo xataa in yar aan laga tala gelin beelaha kale ee dega degaanka. Sidoo kale ayaa Caasimadane loo go'aansan rabaa. Xattaa waxaa la iskudayay in ergada shirka nooga qeybgaleysa dad kale noo xulaan. Arintaan oo kale wax la aqbali karo ma aha. Waxaa loo baahan yahay wada tashi dhab ah, wada hadal iyo gor gortan dhex mara beelaha oo dhan si loo wada go'aansado gogosha shirka iyo Caasimda.
- ❖ Hadii aan wada tashi dhicin, waxaan xaq u leenahay in aan banaanka ka joogno.
- ❖ Beesha Murrasda 'Karanle' waxey ka mid tahay labada beelood ee tirade dadka iyo baaxada dhulka ugu weyn. Markii loo kaco wax soo saarka Beeraha, xoolaha, iyo qeyraadka dhulka waxeey tahay kaalinta koowaad ee gobalada dhexe. Sidaad daraadeed waxeey xaq u leedahay in la siiyo kaalin waafaqsan ee xagga Gudiga Farsamada iyo Xildhibaanada Dowlad Gobaleedka.
- ❖ Sida beelaha kale waxaan xaq u leenahay metelaad codka beesha ee buuxda (sida kor ku xusan). Mar naba ma aqbaleyno in wasiir fulinaayo danaha Dowladiisa na matalo. Waxan ku adkeysanyenaa codka beesha qeybaheeda kala duwan in uu na matalo.
- ❖ Waxaan ka codsaneynaa DFS in eysan u kala eexan beelaha dega gobolada dhexe oo eey tix galiso danta guud ee deegaanka oo dhan.
- ❖ Dowlad iyo Madaxweyne weey imaanayaan weyna tagayaan, lakiin weligeen baan jirnay, xaquudeennana daafici jirnay; weligeena waan jiri doonaa xaquuqdeenana daafacan doonaa. Dowlad kastoo isku dayda xaquuqda ilaahey na siiyay in eey dafirto ka yeeli meyno.
- ❖ Wada tashi, wada hadal iyo gorgortan dhex maro beelaha oo dhan, dowladuna eey dhex dhexaad ka tahay ayaa ah tubta toosan ee beesha Murusade ku qanceyso.
- ❖ Xaalada hada jirta oo eey dowladu riixeyso qorsha gooni u ah beel ama shaqsi ma aha wax la aqbali karo.
- ❖ Waxaan ka codsaneynaa beesha caalamka in eeysan maal gelin nidaam dowlad dhisid ee gobolada dhexe oo aan xalaal aheyn, qayax neyn, kuna saleysneyn dimoqoraadiyad iyo sinnan, eysanna u dhameyn dhamaan beelaha degaanku.

Kala soo xariir: murusade1karanle@gmail.com

No.	Name	Signature
1	Dr. Issa Kheheliye Mali - MP	
2	Xassan Macallin Maxamed. MP PP.	
3	Mohamed Ahmed Hirak - Civil Serv	
4	Adi Ushelle Maxamed Garad	
5	Mohamed Jarih Siid BUSINESS	
6	Mohamed Ahmed Yekaw: Oday dhagay	
7	Ahmed Mukhtar Mohamoud	
8	Abd Karamed Seid Osman	
9	Caasha Osman Ugas	
10	Suldaan Xassan A. Seidap	
11	Mao Dahii Duhulow	
12	Mohamed Sh. Sh. D. Duhulow	
13	Adan Xaji XASSAN	
14	Abdi Mahad Ayi Agjer	
15	MURSI ALI BOBBIK	
16	Eng. Mohamed Awale Jemale	
17	Muurr Xasan Jumaale	
18	Sayid Ali Abdi Sheikh Busew	
19	XUSEN Max'ud Mahadale	
20	BAORE HAYLE ABDI	
21	Mohamed Alii Sheikh	
22	Hassan Sheikh Mohamud	
23		
24	Xil-MP har'una Maxamed Garad	
25	Suldaan Cllaahi Garabey	
26	Nabadoon Maxya BIRWA GAS	
27		
28		
29		